DUGSIGA MADAXBANNAAN DEGMADA 196
Dugsiyada Dadweynaha Rosemount-Apple Valley-Eagan
Waxbaridda ardaydeena si ay u gaaraan awoodooda buuxda

Somali

Lambarka Taxanaha **502.2P** Waxaa laqaatay **Ogast 1999** Dib loo eegay **Abriil 2009**

Cinwaanka **Ahmiyadaha Imaatinka ee Aradayda Beddelka Ah**

1. **Guudmarka** - Nidaamkan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu hirgeliyo mudnaanta imaatinka ee lagu qeexay Nidaamka 502, Beddelaadda Ardayda

2. **Nidaamka Xulista**

   2.1 Beddelaadda waxaa loo oggol yahay dugsiyada, iyadoo aan loo eegin diiwaangelinta, degmada dhexdeeda xannaanada ee ardayda dugsiga hoose (k-5), diiwaangelinta socota ee ardayda fasallada 11-aad iyo 12-aad, iyo ujeeddo ah in la dhiso degganaanshaha ardayda k-12.

   2.2 Beddelaadda waxaa loo aqbali doonaa iskuulada leh boos banaan sida ay u kala horeeyaan ee mudnaanta leh, iyada oo dhammaan beddelaadaha degmada 196 (intradistrict) laga hormarin doono dhammaan beddelaadaha ardayda ku nool banaanka Degmada 196 (dhegmada dhexdeeda), marka laga reebo beddelaadda lagu sheegay qeybta 4.1 hoose.

   2.3 Codsiyada degmada (intradistrict) ee lagu helo waqtiga kama dambaysta ah ee arjiga ayaa lagu kala sarrayn doonaa iyadoo la adeegsanayo habka xulashada bakhtiyaa nasiibka ah. Codsiyada waxaa laga yaabaa inay sii ahaadaan darajo laga dalbado sannad dugsiyeed illaa kan xiga ee isla heerkan ah (ie, hoose, dhexe iyo sare). Codsiyada waa la ansixiyaa marka boos la heli karo. Codsiyada yimaadda kadib wakhtiga kamadambaysta ah waxaa loo tixgeliyaa si ku salaysan xaalad-xaalad.

   2.4 Ahmiyadaha hoose waxay khuseeyaan iskuulada isku heer ah (hoose ilaa hoose, dhexe ilaa dhexe ama sare ilaa sare) maahan inta udhaxeysa iskuulada min heer ilaa heerka xiga (hoose ilaa dhexe ama dhexe ilaa sare).

3. **Mudnaanta Koowaad: Beddeladaa Meelaha Kala Duwan** - Ahmiyadaha hoose ayaa ah ardayda ku nool Degmada 196. Marka ardayga loo aqbalo iskuul ka baxsan aagga uu dhigto, way ku sii nagaan karaan dugsiga ilaa heerkaas (tusaale, ardayda dugsiga hoose waxaa laga aqbalaa ilaa fasalka 5, ardayda dugsiga dhexe ilaa fasalka 8 iyo ardayda dugsiga sare ilaa fasalka 12) marka laga reebo beddelaadda xanaano maalmeedka, oo loo tixgeliyo si ku salaysan sanadle..

   3.1 Beddelaadda La Oggolaaday

      3.1.1 Ardayda dugsiga sare ee ku jira dugsi sare ee Degmada 196 (maxaa yeelay, waxay ku nool xaafada aaggaga iskuulka ee dugsi sare ama iyada oo ah beddelaad la oggolaaday), kuwaas oo u qalma in ay sii wadaan inay ku jiraan dugsigaas sare si sharciga gobolka waafaqsan iyada oo ah sii-waditaan diiwaangelinta ah ee ardayda fasallada 11ad iyo 12ad. Eeg Xeerka 502.4.8AR, Ardayda Beddelaadda: Sii-waditaanka Diiwaangelinta Ardayda Fasallada 11ad iyo 12ad..

      3.1.2 Ardayda dugsiga hoose (fasallada k-5) ee ku nool hal aag xaadiritaanka laakiin ku qaata xanaano maalmeed aagga iskuulka kale dhiganayo. Eeg Xeerka 502.4.4AR, Beddelaadda:Ardayga Daryeelka Ardayda ee Fasalada K-5.

      3.1.3 Ardayda K-12 ee waalidkood damacsan yahay inay deganaanshaha ka beddelaan aagag dugsiyeed oo aag kale aadaan oo u xareeyay arjiga iyo dukumintiyada ku habboon degmada. Eeg Xeerka 502.4.5AR, Beddelaadda:Ardayga Ujeedka Sugidda Degenaanshaha.

3.2 Wareejinta Xaddidan - Dhammaan codsiyada waxaa loo tixgeliyaa sida soo socota:

3.2.1 Ardayda K-12 ee ay saameysay isbedelka aagga kaqeybgalka dugsiga ee degmadu sameysay ee raba inay siiwadato ku jirista iskuulka ay dhiganayeen iyadoo ay xaddidayaan Gudiga Dugsiga waqtiga isbedelka xuduudda la sameynayo.

3.2.2 Walaalaha ardayda k-12 ee lagu sharaxay qaybta 3.2.1 ee kor ku xusan waxaa lagu ansixin doonaa iyadoo lagu saleynayo boos bannaan.

3.2.3 Ardayda K-12 ee codsada boosaska bannaan waa inay codsadaan ugu dambeyn 5-ta Janaayo sannad dugsiyeedka soosocda waxaana lagu darayaa darajo iyadoo la adeegsanayo nidaamka xulashada bakhtiyaa nasiibka Codsiyada la helo wixii ka dambeeya 5-ta Janaayo waxaa lagu shaqeyn doonaa iyadoo loo eegayo sida loo soo kala helay.

3.2.3.1 Codsadayaasha dugsiga sare ma codsan karaan beddelaad kahor sannadka fasalka 8ad, codsadayaasha dugsiga dhexe ma codsan karaan beddelaad kahor sannadka fasalka 5ad, iyo codsadayaasha beddelada dugsiga hoose ma codsan karaan bedelaad illaa ay gaadhaan afar sano jir.

4. **Mudnaanta Labaad: Bedelaada Degmada-dhexdeeda** - Ahmiyadaha hoose ayaa ah ardayda ku nool meel ka baxsan Degmada 196.

4.1 Beddelaadda La Oggolaaday

4.1.1 Ardayda dugsiga sare ee ku jira dugsi sare ee Degmada 196 (maxaa yeelay, waxay ku nool xaafada aaggaga iskuulka ee dugsi sare ama iyada oo ah beddelaad la oggolaaday), kuwaas oo u qalma in ay sii wadaan inay ku jiraan dugsigaas sare si sharciga gobolka waafaqsan iyada oo ah sii-waditaan diiwaangelinta ah ee ardayda fasallada 11ad iyo 12ad. Eeg Xeerka 502.4.8AR, Ardayda Beddelaadda: Sii-waditaanka Diiwaangelinta Ardayda Fasallada 11ad iyo 12ad..

4.1.2 Ardayda K-12 ee waalidkood damacsan yahay inay ka beddelaan deggenaanshaha bannaanka
Degmada 196 illaa Degmada 196, iyo yaa fayl galiyay arjiga iyo dukumintiyada ku habboon kormeeraha macluumaadka ardayda ee Degmada 196. Eeg Xeerka 502.4.5AR, Beddelaadda:Ardayga Ujeedka Sugidda Degenaanshaha.

4.1.3 Ardayda K-12 ee ku jira degmada iyada oo loo marayo barnaamijka ikhtiyaariyada diiwaangelinta gobolka oo doonaya inay sii wadaan ka-qaybgalka dugsiga ay dhiganayeen.

4.2 Wareejinta Xaddidan - Dhammaan codsiyada waxaa loo tixgeliyaa sida soo socota: